


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa



Naagtii Joogtay
Ceelka



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen


Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org


©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyaaso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Ciise iyo xertiisii ayaa socdaal ku dhex marayay
dhulka Samaariya. Waxayna yimaadeen magaalada
la odhan jiray Sukhar.




Meeshaa ceel baa ku yiilay, oo ahayd meesha ay dadka reer Sukhar ka dhaansadaan biyaha ay cabaan. Yacquub, Aabbihi reer Binu Israa'iil, ayaa qoday ceelkan wakhti hore.




3

Xilli ku aadan duhur gaabad kuleyl iyo qoraxna ay jirto. Isaga oo daalan, ayuu Ciise ag fariistay ceel biyaha laga dhaansado intii ay xertiisa ku magnaayeen magaalda Sukhar si ay cunto uga soo iibsadaan.



4

Ciise keligii buu ahaa - laakiin naag ku nooleyd magaalada Sukhar ayaa u timid si ay biyo uga dhaansato ceelka.



5

Naagtii way yaabtay. "Sidee baad, adigoo Yuhuudi ah, biyo ii weyddiisanaysaa, anigoo anigoo naag reer Samaariya ah?" ayay tidhi. Maalmahaas, Yuhuudda dan kama lahayn reer Samaariya!




6

Oo aad bay ula sii yaabtay iyadii markii Ciise ku yidhi, "Haddaad garanaysid Kana an ahay, adigu waad i weyddiisan lahayd biyaha nool."




7

Naagtii Ciise waxay ku tidhi, "Sayidow waxaad biyo ku dhaansato ma hayatid, ceelkuna wuu dheer yahay. Haddaba xaggeed ka helayaa biyaha nool? Miyaad ka weyn tahay awowehayagii Yacquub ee ceelka ina siiyey....?"




8

"Kii kasta ee biyahan ka cabaa, mar kale wuu haraadi doonaa," Ayaa Ciise ku yidhi naagtii. "Laakiinse, ku alla kii ka cabaa biyahaan siin doono, weligii ma haraadi doono. Biyaha aan siin doono ... gudihiisa ayay ku noqon doonaanil biyo ka duulayaan tan iyo nolosha weligeed ah." "Sayidow biyahaa sii." Bay tidhi naagtii.




9

Ciise wuxuu yidhi naagtii tag oo ninkaaga iigu yeedh. "Nin ma lihi" bay tidhi naagtii. "Shan nin baad lahayd," buu Ciise ku yidhi. "Oo kan aad haddeer haysatidna ninkaaga ma aha."




10

Naagtii waxay garatay in Ciise nabi yahay. Waxayna isku dayday inay kula muranto Isaga waxyaalo ku sabsan caabudidna Ilaah: Yerusalaam ama buurta Samaariya ee qudduuska ah baa. Ciise wuxuu ku yidhi caabudidna caabudyaasha runta ah waa ta Aabbaha Ruuxa runta ah.



11

"Waan ogahay Masiixu inuu inuu imanayo," ayay ku tidhi naagtii Ciise. "Oo markii uu yimado, wax walba ayuu inoo sheegi doonaa." "Anigoo kula hadlaya ayaa ah Isaga," ayuu ku yidhi iyadii Ciise. Iosla markii, waxaa yimid xertii. Naagtii ayaa ashuunkeedii qaaliga haa isaga tagtay, oo magaaladii u baxday.



12

"Kaalaya oo arka ninkii ii sheegay wax walba oo aan sameeyey," naagtii dadkii magaaada Sukhar bay u sheegtay. "Miyaanu kani ahayn Masiixa?" Markaaseey dadkii magaalada ka soo baxeen oo ay arkeen Ciise iyaga qudhooda.



13

Ilaa wakhtigaas, xertii Ciise waxay ku lhaayeen wax cun. Laakiin Ciise wuxuu ku yidhi, "Cuntadaydu waa inaan sameeyo doonista kii i soo diray oo an shuqulkiisa dhameeeyo." Shaqadiisa waxay ahayd in dadka uu u keeno Ilaah.



14

Samaariyiin
badan baa
rumeystay
Isaga sababtoo
ah ereygii
naagta.
Waxayna
weyddiiyeen
Ciise inuu la
joogo iyaga, oo
laba maalmood
buu la joogay.

15

Dad fara badan
baan rumeystay
sababtoo ah
erayadii Ciise
qudhiisa.
Waxayna
yidhaahdeen,
"Waanu
maqalnay,
waannuna
naqaan kanu inuu
yahay Masiixa,
Badbaadiyaha
dunida."

16

Naagtii Joogtay Ceelka

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Yooxanaa 4

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiya." Sabuurka 119:130

17

Dhammaad

47

60

18

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysantahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad ugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

19